LIFFAQA 2
Taariikhda
2015-08-11

Somaliska

Heshiiska iyo shuruudda amaahashada kombiyuutarada ardayda ee 2015

Ururka dugsiga sare ee Kalmarsund wuxuu ku soo dhaweynayaa ardayda iney amaahdaan kombiyuutarada inta lagu jiro xilliga waxbarashada. Danaha amaahinta kombiyuutarada waa in ardayda la siiyo fursad helitaan qalab casri ee u sahlaya waxbarashadooda.

Mas'uuliyadda ardayga iyo waalidka

Si ardaygu u helo kombiyuutarka waxay u baahan tahay in ardayga iyo mas'uulkiisa ay wada aqbalaan shuruudaha ayagoo saxiixaya foomka heshiiska (lifaaqa 1).
Heshiiska waxaa wadajir u aqbalaaya ardayga iyo waalidka ama qofka mas'uulka ka ah. Marka mas'uulka ardayga uu qalinka saxiixa ku duugo heshiiska wuxuu aqbalayaa in waajibaadka heshiiska ku qorani ay ardayga dusha ka fuushay. Intaas waxaa dheer in waalidka isagoo ardayga garabsiinaya uu mas'uuliyad ka qaado dhammaan waajibaadka ardayga ka saaran ururka dugsiga sare ee Kalmarsund sida heshiiska ku cad. Waalidka ama qofka mas'uulka ahi wuxuu dusha u tuuranayaa mas'uuliyadda ardayga xataa uu ardaygu gaaro da'da qaangaarnimada.

Fiiro gaar ah
Haddii uu ardaygu doorto inuu ka fogaado soo dhaweynta la siinayo fursadda amaahashada kombiyuutarka shakhsiga markaa dugsiga ayaa wuxuu siinayaa inta lagu jiro xisada waxbarashada kombiyuutar uu isticmaali karo magaciisa lagu qorayo uuna soo celinayo maalin walba. Kombiyuutarkaa markaa ma ahan mid isaga u gaar ah loomana qaadan karo guriga ama meel kale.

Qeexidda Amaah-bixiyaha iyo amaahqaataha

Amaahbixiye: Kalmarsunds gymnasieförbund
Amaahqaate: Arday ku qoran dugsiga Kalmarsunds gymnasieförbund, oo hoos loogu yeeri doono Arday. Ka mid ah ardayda dhigata dugsiga sare ee Kalmarsund.

Qalabka

Heshiiskani wuxuu khuseeyaa qalabyadan: kombiyuutarka iyo kartoonkii lagu soo iibiyey ku jira iyo xarigga korontada iyo galka la socda (qalabka hoos ayaa lagu xusay). Haddii uu ardayga kombiyuutarka ku qaato kartoonkiisa asalka ah, markaa waa in uu kartoonkaas xafidaa oo soo celiyaa marka uu kombiyuutarka soo celinayo. Marka la soo celinayo kombiyuutarka waxaa lagu soo celinayaa isla kartoonkii lagu bixiyey oo uu la socdo kaabilada iyo adhabtarada la socday markii la bixinayey.

Waqtiga amaahda

Amaahdu waxay shaqeyneysaa waqtiga uu ardaygu ku qoran yahay Ururka Dugsiga sare ee Kalmarsund. Ardaygu waa inuu soo celiyaa qalabka waqti fiican inta aan la gaarin xiritaanka dugsiga. Haddii aan kombiyuutarkaas lagu soo celin waqtigii loo qabtay, waxaa ardayga lagu soo dalacayaa sicirka waqtiga kombiyuutarka ay ahayd in lagu soo celiyo. Marka uu xilliga amaahada dhammaado ama ardaygu uu iska joojiyo ama ka tago waxbarashada ka hore waqtiga la qorsheeyey waa inuu ardaygu si dhaqso leh ku soo celiyaa qalabka.
Taana waa inuu ardaygu iskii u soo celiyaa ayadoon la ogeysiin.

FÖRBUNDSKONTORET
Besöksadress Stagneliusgatan 33
Postadress Box 865, 391 28 Kalmar
Tel 0480-45 15 00
E-post gymnasieforbundet@gyf.se
Hemsida www.gyf.se
Org nr 832401-6453

KALMARSUNDS
GYMNASIEFÖRBUND

Datum
2015-08-11

Haddii aysan sidaas dhicin wuxuu dugsiga sare ee Kalmarsunds ku soo dalacayaa ardayga qiimaha qalabka. Ururka dugsiga sare wuxuu xaq u leeyahay inuu waqtigey noqotaba joojiyo heshiiska ayna dhaqso u hirgesho joojinta.

Shuruudaha in qofku uu ka taxadaro qalabka

Marka ardaygu guddoomo qalabka wuxuu qaaday mas'uuliyadda in aan qalabkaasu soo gaarin dhaawac, waxyeelo, uusan lumin ama uusan baabi'in. Ardaygu wuxuu kaloo mas'uul ka yahay in uu qalabkaas xafido inta uu amaahda ku haysto oo uusan u isticmaalin waxaan ka ahayn waxa heshiiska ku qoran oo ay ka mid yihiin qodobada xagga hoose.

Qalabka waxaa loo isticmaalayaa si taxadar leh oo mecnaheedu ka mid yahay.

- **Saddexda V ee muhiimka ah**

3
Shandada
Qoyaanka
Taxadarka

- Shandada (Vätska);
  Kombiyuutarka waa in lagu xafido galka ama boorsada markasta oo meel loo qaadayo ama lala safrayo. Waa inaan marnaba lagu dhex wareegin marinada dugsiga ayadoo aan kombiyuutarku ku dhex jirin galka.
- **Wax qoyaan ama dareere ah waa inaan la ag geyn ama aan wax lagu cunin agagaarka kombiyuutarada** si looga fogaado dhaawaca ka yimaada qoyaanka.
- **Taxadar** - qalabka waxaa loola dhaqmayaa si ah xatooyo u nugul..
  - Waa in aan marbana looga tegin armaajada ardayda habeenkii.
  - Qalabka lagama tegi karo ayadoon cidna ilaalineyn, ha noqoto fasalka gudihii ama qolal kale ama dibedda iskuulka; markaa caymisku ma dabboolayo khasaaraha ka yimaada marka qalabka laga tago ayadoon la ilaalineyn, looga tago qolalka ama goobaha dadweynaha.
  - Caymiska wuxuu dabboolayaa keliya khasaaraha/xatooyada qalabka haddii ay dhacdo in qalabka uu lumo ama la xado oo ay muuqato in muraayadda dariishadda ama qufulka la jebiyey.

- Shirkadda caymiska waxay bixineysa kharashka haddii kombiyuutarku uu lumo ama la xado iyadoo meeshii uu yaaley la soo jebsaday oo ay si u muuqato in muraayadda dariishadda ama qufulka albaabka la jebiyey.
- Ardaygu asaga ayaa mas'uul ka ah inuu sameeyo koobiyada loo baahan yahay. Ururka dugsiyada sare ee Kalmarsunds fursad uma haysto inuu mas'uul ka noqdo waxyaabaha luma marka la sameynayo dayactirka, damaanada adeegga ama sababo kale. Waa mas'uuliyadda ardayga inuu si nadaamsan uu koobi la hubo ugu sameeyo waxyaabaha ku xafidsan kombiyuutarka oo dib loo soo saari karo marka uu dhib dhaco.

- Marka qalabka la soo celinayo ayaa mas'uuliyaddu waxay saaran tahay ardayga inuu qalabku ku suggan yahay xaalad wanaagsan oo aan lahayn wax cillad ah.
- Waxay kaloo ardayga mas'uul kaga saaran yahay dugsiga Kalmarsunds in marka uu kombiyuutarka dugsiga ku soo celinayo aysan ku dhegsaneyn wax calaamado ah oo aanay lahayn markii hore ee la bixinaayey. Waana inaan waxna lagu dul qorin ama lagu dhejin wax midabyo leh.

Dhaawacyada ka yimaada taxadar la'aan/kutalogal

Dhaawacyada ku yimaada qalabka ee ka timaada taxadar la'aanta ardayga markaa waxaa ardayga saaran inuu bixiyo magdhaw. Xaaladahaana caymiska guud ee dugsiga Kalmarsund ma dabboolayo kharajka, ardayga ayaa laga rabaa inuu magdhawga kharajka siiyo dugsiga Kalmarsund. Ardayga waxaa lagula talinayaa inuu fiiriyo hadday macquul tahay inuu shirkadda caymiska gaarka u ah inuu kala saxiixdo caymis dabboolaya kharajka dhaawacyada qalabka ee ku yimaada taxadar la'aanta ardayga.
Taxadar la'aanta isticmaalka qoyaan, marka kombiyuutarka looga tago ilaalin la'aan ama la dhigay dabbool la'aan waxay keeni kartaa dhaawayo kaasoo u dhigma kharajka soo ibinta kombiyuutar cusub. Dhalabka kale ee taxadar la'aanta waxay ku jirtaa lifaaqa shuruudaha caymiska, ee xitaa laga heli karo bogga internetka
www.gyf.se/gyfelevdator.

Fiiro gaar ah
Waxyeelo ulakac ah ee uu ardaygu u geysto qalabka marnaba ma mudna magdhow.

Caymiska- iyo damaanadqaadidda haddii uu dhaco shil, xatooyo ama dhac

Haddii qalabka inta uu qofku ku haysto amaah ahaan la dhawaaco ama uu ku yimaado dhaawac waa inuu ardaygu islamarkiiba uu soo wargeliyaa dugsiga sare ee uu ardaygu dhigto. Qalabku wuxuu ku jiraa damaanad iyo caymiska guud ee kombiyuutarada ardayda ee yaala ururka dugsiyada sare. Caymisku wuxuu dabboolayaa dhaawacyo qaar ee ka yimaada shil, xatooyo iyo dhac. Haddii khasaare uu soo gaaro qalabka waa inuu ardaygu isla mar ahaantiiba wargeliyaa booliiska kadibna uu koobiga ashtakada wargelinta usoo gudbiyaa ururka dugsiyada sare ee kalmarsund. Sida ku cad heshiiska caymiska kor ku xusan ayaa lacagta jaritaanka (självrisk) waxay gaareysaa 1000 kr. Marka caymis uu dhacayo ayaa waxaa ardayga laga rabaa inuu lacagtaa ka jaritaanka shakhsiga usoo gudbiyo ururka dusgsiyada sare ee Kalmarsund

Xaqa lahaanshaha (Äganderätt)

Ururka Dugsiyada sare ee Kalmarsunds gymnasieförbund ayaa waxay doorkeedana keentay qalabka ayadoo ku bixineysa ijaar ama iibsasho. Ardaygu xaq uma lahan inuu qof saddexaad ka sii gado, rahan ahaan u dhigo ama uu amaahiyo.

Haddii aan heshiiska lagu dhaqmin

Ardayda waxay aqbalayaan ayna fulinayaan heshiiskan oo ah in la raaco oo lagu dhaqmo qawaaniinta iyo sharciyada u dhigan qalabka.
Haddii shuruudahani aan la raacin, Ururka Dugsiyada sare ee Kalmarsundwuxuu xaq u yeelanayaa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan ku joojiyo heshiiska amaahda halkaasoo ardaygu uu ku waayayo xaqiisa inuu sheegto kombiyuutarka ardayda.

Marka heshiisku dhammaado

Heshiisku wuu dhammaanayaa maalinta lasoo celiyo qalabka. Ururka Dugsiyada sare ee Kalmarsund wuxuu markaa 3 bilood kadib waqtigaa ka dalban karaa ardayga kajirtaanka kharajka caymiska (självrisk), wuxuu codsan karaa magdhawga lacagta ka jaritaanka caymiska ama/iyo dhaawac sida ku cad kor.

Helitaanka kombiyuutarada, shabakadaha khadka wifi iyo adeegyada internetka

Internetka ayaa wuxuu suuragelinayaa isgaarsiinta iyo isdhaafsiga warbixinada ay is dhaafsadaan dadyow iyo machado kala duwan ee dunida. Xiriiryadaa ayaa ah in ardaygu u dhaqmo si xurmad badan.

Taana waxaa mecnaheedu yahay in ardaygu

- Uu isticmaalayo luqad la sifeeyey (dhowris badan)
- Uu u muujinayo ixtiraam dadka kale
- Ku dhaqmayo qawaaniinta iyo tilmaamaha loo dejiyey kombiyuutarada ururka dusiyada sare ee kalmarsund iyo sharciga iswiidhishka.Gaar ahaan lagu xusay sharciyada xeerka nuqulka iyo xeerka ciqaabta.

Taasi waxay mecnaheedu tahay in ardaygu aanu yeeli Karin inuu

- Isku dayo inuu helo ilaha shabakado internet ee aanu xaq u lahayn.
- Inuu qariyo aqoonsiga shakhsiyaddiisa isticmaalka.
- Inuu dhibo ama kala gooyo isticmaalka shabakadaha
- Inuu khasaariyo ilaha khayraad (shaqaalaha, qalabka iyo barnaamijyada kombiyuutarka).
- Inuu kala dhex galo nolosha gaarka ah ee shakhsi kale.
- Inuu dad kale caayo ama uu ceebeeyo.

Fiiro gaar ah

Sharciga iswiidhan wuxuu shaqeynayaa **xaaladahoo dhan**. Hawlo dembi ah waxay noqon kartaa dacwad booliis. Gelitaanka kombiyuutarada ama shabakadaha internetka marka uu dembi jiro waa la diidi karaa.

Helitaanka xiaabta boostada elektarooniga iyo waraaqaha xafidsan – qalabka Google ee waxbarashada.

Ururka Dugsiyada sare ee Kalmarsund wuxuu bixinayaa boostada elektarooniga iyo adeegyada kaleendarka ee adeegyada internetka ee loo yaqaan Google Apps for education (ksgyf-konto)

- Ardaygu wuxuu balanqaadayaa markuu magaciisa ku saxiixo inaan lagu xafidi karin qalabka google (google apps) warbixino xasaasi ah.
  Sida ku cad sharciga warbixinta shakhsiga ayaa warbixinada shakhsiga ee xasaasiga ah waxay yihiin kuwa kashafaya asalka iyo jinsiyadda, fikradaha siyaasadeed, iyo aaminaadda diimeed iyo falsafadeed, xubinnimada ururada shaqaalaha iyo warbixino shakhsi ee ku saabsan caafimaadka iyo nolosha jinsiga shakhsi. Warbixinada caafimaadka waxay noqon kartaa tusaale ahaan fasaxyada cusbitaalka, xilliga uurqaadista iyo booqashada dhakhtarka.
- Ardaygu waxaa lagula talinayaa inuu tirtiro dhammaan waraaqaha iyo dokumentiyada inta aanu dhammaan xilliga sanad dugsiyeedka.
- Xaqa uu shakhsigu u leeyahay xisaabta -ksgyf waxay dhammaaneysaa maalinta uu dugsigu xirmo. Xisaabta lambarka isticmaalka kombiyuutarka waa la xirayaa, qalabyadana waa lakala soocayaa sida ugu dhakhsiyaha badan marka sanad dugsiyeedku dhammaado.
- Guddiga maamulka ururka dugsiyada sare ee Kalmarsund ayaa ka mas’uul ah warbixinada shakhsiga iyo la dhaqanka warbixinada shakhsiga inuu u dhaco sida

waafaqsan sharciga warbixinta shakhsiga. Wixii warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga internetka ee www.gyf.se/gyfelevdator.